

5

Waxyaabaha ay tahay in qofkasta oo waalid ah inuu ka ogaado qorshaha Gobalka New York ee ku saabsan Every Student Succeeds Act



Waa maxay ESSA?

Sharciga guusha arday kasta (he Every Student Succeeds Act (ESSA) waa sharci kasoo tilmaamaya sida dawlad gobaleedyadu u isticmaali karaan lacagta dawlada federalka ah katimaada si loogu taageero iskuullada dadwaynaha. Bishii Janaayo 2018, Dawlad Federalka ah ayaa ansixisay Qorshaha gobalka New York oo lagu qarash garaynaayo \$1.6 milyun.

Maxay muhiim utahay?

Dawlad gobaleedka New York wuxuu utaaganyahay xaqijinta in dhamaan ardaydu ay guul iyo hormar kakeenaan iskuulka ayadoon loofiirinayn cida ay yihiin, meesha ay kunoolyihiin, meesha ay iskuul kadhigtaan, ama halkii ay kayimaadeen. Lagasoo bilaabo xiligii xagaaga ee 2016, Dawlad Gobaleedka New York waxay dalbaltay fikir si loo dajiyo qorshe kor loogu qaadaayo sinaanta, helitaanka, iyo fursadaha lasiinaayo *dhammaan* ardayda.

Maxaa laga rabaa in waalidiintu ogaadaan?

Hoos waxaad ka helayaa waxyaabaha muhiim u ah in waalidiinta iyo qoysasku ka ogaadaan qorshaha. Waxaan kugula dhiiragelinaynaa inaad booqato qaybta ESSA ee websetka NYSED.

1

Gobalka New York wuxuu qiimaynayaa waxbarasho ay usimanyihiin dadkoo dhan.

Waalidiinta iyo qoysasku waa inay oggaadaan sida ay tahay xaalada iskuulka uu cunugoodu dhigto ayagoo kafiirinaaya meelo badan, oo aysan kaliya kafiirin maadooyinka cilmiga.

Iskuulada iyo degmooyinka waxaa lagu qiimaynayaa sanad kasta cabirada soo socda:

Qiimaynta lagu sameeyo mustaqbalka iskuulka:

Dhamaan iskuulada oo dhan

Iskuulada dugsiga sare

- Xiliyada ardayga iskuulka laga cayrshay (ayadoo lagu bilaabaayo natiijooyinka sanad dugsiiyeedka 2018-19)
- In uu ardaygu diyaar uyahay dugsiga sare (marka macluamadku diyaar noqdaan)

- Barahsada Luuqada Ingiriisiga
- Xisaabta
- Sayniska
- Hormarka laga sameeyo barashada Ingiriisiga (ardayda Ingiriiska udhigta sida luuqad dheeri ah)
- Maqnaanshaha xad dhaafka ah (maqnaanta kabadan 18 maalmood, oosababo leh) 10%

- Cilmiga bulshada
- Heerka qalinjabinta
- Kuleejka, xirfada, tasmada diyaar garoowga ardayga: qaadashada koorso dheeri ah, qaadashada shahaadada barashada farsamada, iwm.

2

Gobalka New York wuxuu doonayaa inuu yareeyo waqtiga imtaxaanka uuna kor uqaado khibradaha imtaxaanka.



95%



Imtaxaanaadkafasalada 3-8 ee Ingiriisiga iyo xisaabta waxaa lagusoo koobayaa laga bilaabo labo maalmood midkiiba.

Sharciga ayaa kadoonaaya 95% ardayda oo imtaxaan laga qaado inay sameeyaan imtaxaanaadka gobalka ee saxda ah. Gobalka New York wuxuu la shaqaynayaa waalidiinta, iskuulada, iyo degmooyinka si loo kordhiyo ka qaybgalka.

Gobalka New York wuxuu sii wadayaa inuu kuturjumo imtaxaanaadka xisaabta iyo sayniska luqaddo badan, marka qarashku diyaar noqdana, wuxuu usamaynaa imtaxaanka luuqadaha oo ku qoran luuqada hooyo ee ardayda imtaxaanka galaysa.

3

Gobalka New York wuxuu kacaawinayaa macalimiinta iyo maamulayaasha iskuulada inay udiyaar garoobaan siday guul kugaari lahaayeen ayna uxaqiijin lahaayeen in dhamaan ardaydu ay helaan waxbarasho heer sare ah.



Gobalku wuxuu fiirinayaa isbadalada laxiriira sida macalimiinta iyo maamulayaasha iskuuladu diyaar ugu yihiin si loo hubiyo inay udiyaar garoobaan maalinta koobaad.



Gobalka New York wuxuu leeyahay macalimiin badan oo cajiib ah. Waxaan xaqiijinaynaa in dhamaan iskuuladu ay awood uleeyihiin inay soojiitaan ayna ilaal sadaan.

4

Gobalka New York wuxuu dhisayaa nidaam lagu waydiisanaayo waalidiinta inay gacan dheeri ah kagaystaan marka iskuulka caruurtoodu dhigtaan laga doonaayo inuu kobac sameeyo.



Hadii iskuulka cunugaaga loo aqoonsado mid aan dadaal fiican lahayn ...



...sidaas awgeed waxay waydiinaysaa waalidiinta, macalimiinta, iyo ardaydaba sida ay isleeyihiin iskuulku hormar ayuu kusamayn karaa ...



... waxaadna awoodi doontaa inaad kaqaybgasho go'aminta sida iskuulkaagu uqarash gareeyo qayb kamid ah lacagta dawlada federalku bixiso si uu hormar usameeyo.

5

Gobalka New York wuxuu sinayaa waalidiinta sawirka dhabta ah ee iskuulka uu cunugoodu dhigto.



Warbixinada cusub ee dadwayaha ayaa muujinaaya macluumaada kusaabsan natiijooyinka imtaxaanka ee ardayga, heerarkiisa qalinjabinta, iyo natiijooyinka kale ee iskuulada, degmooyinka, iyo gobalka, ayadoo la raacaayo sharciga dhawrista arrimaha shaqsiga ah.

Warbixinada waxay sidoo kale macluuaad kabixinayaan waxyaabaha waalidiintu aadka u danaynayaan, sida xajmiga fasalka ama fursadaha ardayda loosiiyo inay kaqaybgalaan farshaxanada.

Waalidiintu waxay ogaanayaan inta ay le'egtahay qarashka uu iskuulku kubixiyo ardayda kasta ayadoo lagusoo gudbinaayo warbixinada cusub.



Waaxda Waxbarashada ee Gobalka New York waxay u adeegsanayaan macluumaadka kujira warbixinadaan si degmada looga caawiyo inay balaariyaan qarashka ay bixiyaan ama ay layimaadaan qaabab cusub si loobuuxsho baahiyaha ardayda.